FAAFINTA
الرسمية

RASMIGA
الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 12-aad. Garowe 18 December, 2010 Lam.12

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهرية

*Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Sharci**

**Sharciga Tahriibta Dawladda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

*Sharci Lr.4. ee 18/December/2010, kuna saabsan Sharciga Tahriibta Puntland.*

| DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA | | PUNTLAND STATE OF SOMALIA |
|---|---|---|

**Sharci Lr.4 ee 18/December/2010, Kuna saabsan Sharciga Tahriibta Puntland.**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**Markuu arkay :** Dastuurka Dawladda Puntland qodabkiisa 80-aad;

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/128/2010 ee 16/12/2010.

**Markuu Tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkan tahriibtu u leeyahay Dawladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Xeerkan soo socda:**

**<u>Qodobka 1-aad</u>**

Golaha wakiiladdu waxay ansixiyeen xeerka Tahriibta Dawladda Puntland.

**<u>Qodobka 2-aad</u>**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keedinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan qaryaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Golaha Wakiilada.

**<u>Qodobka 3-aad</u>**

Dhaqan galka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaasoo laga baahinayo idaacadaha iyo jaraa'idka muddo 7 (Todobo beri ah). Baahinta ka dib ayuu xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Farole)**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

Golaha Wakiillada

Xafiiska Guddoomiyaha

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

House of Representatives

Office Of the Speaker

*Ref:-* XGGW/DPL/ 128 /2010

Date:- 16/12/2010

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Tahriibta

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-**

MARKUU ARKAY:- Dastuurka DPL Qodobkiisa **64-aad**

MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta K/S Madaxweynaha **MWK/DPS/485/2010** ee **25/11/2010** kuna saabsan Xeerka Tahriibta.

MARKUU TIXGELIYEY:- Baahida loo qabo in la helo Xeer lagu xakameeyo dadka sida sharci darada ah uga dhoofaya xeebaha Puntland.

MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Tahriibta.**

**Allaa Mahad Leh.**

**C/rashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STA

| DOWLADDA PUNTLAND<br>EE SOOMAALIYA<br>XAFIISKA<br>MADAXWEYNAHA | | PUNTLAND STATE OF<br>SOMALIA<br>OFFICE OF THE<br>PRESIDENT |
|---|---|---|

Xeer Madaxwayne Lr---4-- 6dii Nofembar 2010, kuna saabsan Xeerka Tahriibta.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay : Dastuurka Dawladda Puntland;

Markuu dersay: in xaaladaha nabad-gelyo xumo ee dalka ku Soo kordhay, taasoo horseedi karta in Puntland ay noqoto hoy-tahriibeed;

Markuu tixgeliyey: Marxaladda la marayo ee la xiriira tahriibta

**Wuxuu soo saaray**

**Qaanuunka soo socda :**

**Qodobka-1aad**
**Macnayn**

1. Tahriibayaal waxaa loola jeedaa dad doonaya in ay si sharci darro ah uga dhoofaan xeebaha Puntland.

2. Tahriib-qaadayaal waxaa loola jeedaa dad haysta gaadiid-badeed, berri oo ay ku qaadaan dadka tahriibaya, iyadoo ujeedadoodu tahay si ay dhaqaale uga helaan.

**Qodobka-2aad**
**Celin Tahriibayaal**

1. Qof kasta oo raba in uu Puntland ka tahriibo oo ay ciidamada amnigu qabtaan, waxaa loo celinayaa halkii uu ka yimi, marka laga reebo dadka loo aqoonsaday qaxootinimo waafaqsan heshiiskii Jineefa (**Geneva1949**), kana diiwaangashan hay'adda UNHCR iyo Wasaaradda Amniga iyo DDR ee Puntland.

2. Dadka qaxootiga ah ee ka diiwaangashan hay'adaha ku xusan qodobkan, faqradiisa kowaad ee ku xadgudba xeerkan iyo qawaaniinta dalka waxay muteysanayaan ciqaabta xeerka tahriibta iyo shuruucda kale ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 3aad
## Dhibanayaasha Safarka Tahriibta

1. Qof kasta oo qaada tahriibayaal safarka dhexdiisana u geysta qof kale dil dhimasho keenay, maxkamadda horteedana ay kaga cadaato waxaa la marinayaa xukunka Shareecada Islaamka.
2. Qof kasta oo qaada tahriibayaal, una geysta waxyeelo isugu jira mid jireed, maskaxeed iyo moraal muddada safarka ee berriga iyo badda lagu jiro, waxa uu muteysanayaa ciqaab xarig 3--5 sano, iyadoo ay u dheer tahay magdhowga dhibtii uu geystay.
3. Cid kasta oo abaabusha, fududeysa, gacan ka geysata tahriib-qaadidda waxaa lagu ciqaabayaa xarig gaaraya 1 ilaa 3 sano .

## Qodobka 4aad
## Tahriib-qaade

Qof kasta oo fal-dambiyeed tahriib-qaadis ah gala ama lagu qabto oo aan geysan tacadiyada ku xusan faqradaha 1-aad iyo 2-aad ee qodobka 3-aad ee isla xeerkan, waxaa lagu ciqaabayaa xarig u dhaxeeya 2 -- 5 sano.

## Qodobka 5-aad
## Hanti La-wareegid

Waxaa lala wareegayaa hanti kasta oo lagu galay fal-dambiyeed la xiriira Tahriibta (Gaadiid Badeed, Barri, Cir ama qalab kale)

## Qodobka 6-aad
## Burin

Waxaa la buriyay xeer kasta oo ka horimanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qododka 7aad
## Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo Faafinta Rasmiga ahna lagu soo saaro..

**Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

Office of the President * Puntland State of Somalia *